



Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

WAR-SAXAAFADEED 020/2009

BULSHADA CAALMKA OO SHIR KU YEELANAYSA ROOM SI AY UGA WADA HADASHO ARRIMAHA SOOMAALIYA

Nayroobi, 9 Juun 2009 - Ergaygga Gaarka ah ee Qarammadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya, Ahmedou-Ould Abdallah ayaa sheegay in Shirkaa 15 Tobnaad ee Kooxda Caalamiga ah ee Laxiriirka Arrimaha Soomaalia lagu qaban doono Rooma inta u dhaxaysa 9-10 Juun. Waxaana la filayaa in ay ka soo qayb-galaan wakiilo ka socda in kabadan 35 dal iyo ururo caalami ah.

“Wakhtigan aad buu muhiim ugu yahay Soomaalia waxaana aad muhiim u ah in Bulshadda Caalamka ay siiso taageero xoog leh Dowladda Sharciga ah”, ayuu yiri Mudane Ould-Abdallah oo shir gudoomiinaayo shirka kooxda laxiriirka caalamiga ah.” Urur Goboleedka IGAD oo uu weheliyo kan Midowgga Afrika ayaa iyaguna aad u walaacsan sida bulshada caalamka inteeda badan uga walaacsan tahay dhibaataada dheeraata ee Soomaaliya. Walaacooduna waxay noogu muujiyeen kulankoodi dhowaa..”

Ergaygu waxa uu yiri Soomaaliyaa marwalba waxa ay ka heli jirtay taageero saaxiibada dunida inteedi kale ay ku leedahay. Kooxdan la xiriirka caalamiga ah oo ay unkeen dowladaha Maraykanka yo Norway waxa ay shirkoodi ugu horeeyay ku yeesheen New York, sanadkii 2005, shirkoodi labaadna waxa ay ku yeesheen London. Sanooyinkii u dambeeyayna, waxaa aad u kordhaayay ka midnoqoshada kooxdani, arrintan oo muujinaysa sida ay isu soo taraysa in xal loo helo dhibaataada Soomaaliya.

Shirku waxaa uu ka hadli doonaa arrimaha siyaasadda, Amniga, bani-aadnimadda, iyo horumarintuba. Arrinta burcad badeednimadda, oo looga hadlay shirar kala duwan oo ay yeesheen khubaro ka la gedisan, ayaa ayaduna ajendada kamid ah. Shirka waxaa ka soo qayb-geli doona Raisul-Wasaaraha Soomaaliya.

“Wada hadaladani waxay ku saabsanaadon sidii loo taageeri lahaa Dowladda sida sharciga iyo caalamiga ahba loo taageersanyahay”, ayuu yiri Ould-Abdallah.” Sida ay talo ahaan isugu dayeen in ay u soo jeediyaan dadka qaarkiisa, majirayaan wax suaal ah oo ku saabsan wada hadal hadda ku dhexmarayaa dadka Soomaaliyeed shirkan. Kooda caalamiga ah ee la xiriirka Soomaaliya waa koox ah saaxiibo Soomaaliyeed mana aha shirkoodan goob lagu wada gor-gortamayo.

Waxaan doonayaa in aan u mahad celiyo Dowladda Talyaaniga oo ku deeqday in ay martigeliso shirkan. Waxaana rajaynaynaa in shirkan uu yeesho wadahadal waxtar leh oo natiijo ka soo baxdo.

Wixii war dheeraad ah fadlan la xiriir: Susannah Price / Donna Cusumano,
Public Information Officers, UN Political Office for Somalia (Nairobi, Kenya)

Tel: +254 20 762 7132 / 7133 or +254 733902020 / 737400133

Please visit: www.UN-Somalia.org